KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad Muqdisho, Tr. 1 Jennayo 1974 L. 1

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ku tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 1 Tr. 13 Dishembre 1973 — *Guddiga Maamulka Wakaaladda Moska.* Bog 3

SHARCI L. 2 Tr. 20 Dishember 1973 — *Canshurta qiimaha Guryaha Daaraha ah.* » 4

SHARCI L. 3 Tr. 25 Dishember 1973 — *Toosin qodobka 220 aad ee Xeerka habka ciqaabta.* » 7

SHARCI L. 4 Tr. 27 Dishember 1973 — *Qalidda sabab-baarista dhimashada qaadidda iyo ka-faa'ideysiga xubnaha aadanaha.* » 7

SHARCI L. 5 Tr. 27 dishember 1973 — *Tijaabo cilmi ah oo lagu samayanyo dadka iyo xoolaha.* » 11

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 17 Dishembre 1973, L. 1 — *Magacaawgii Wakiillada beesha-idaarada guddiga Kacaanka ee damgmada Gorawe.* » 13

XEER WASAARADDA CADDALADDA IYO DINTA, 27 Dishember 1973, L. 2 — *Magcaabid Garsoorayaasha Cusub.* Bog. 15

XEER WASAARADDA CADDALADDA IYO DINTA, 27 Dishember 1973, L. 3 — *Magcaabid Garsoorayaasha Cusub.* » 17

Madbacada Dawladda — Muqdisho

Qodobka 3aad

*Dhaqan gelid*

Sharciganu wuxuu dhaqan geli doonaa isla marka uu saxeexo Jaalle Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Dishembre 1973.

*Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

---

**SHARCI L. 2 Tr. 20 Dishembre 1973.**
**Canshurta Qiinaha Guryaha Daaraha ah.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Qodobka 30aad ee Sharciga 14 Agosto 1963, tiradiisuna tahay 19 iyo baddalkii ka dambeeyay ee caddeynayay Cashuurta iyo xuquuqda ay Dawladda Hoose qaadi karto;

MARKUU ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 27 ee soo baxay 29 Marso 1971, oo lagu kordhiyay Cashuurta guryaha carshaanta iyo baraakooyinka ee ay qaado Dawladda Hoose, taasoo ah 15 Shilin weynaha qurxinta iyo wanaajinta Magaalada Xamar;

MARKUU ARKAY Sharciga 1aad Agosto 1966, tiradiisuna tahay 12 ee ku saabsan baaridda iyo ciqaabta lagu qaado jabinta Sharciyada dhaqaalaha;

MARKUU OGAADAY In loo baahan yahay in la soo saaro Sharci ciqaabaya qofkii bixin diida cashuurta ay qaado Dawladda Hoose ee Xamar oo ah Cashurta Guryaha Carshaanta ah, Baraakooyinka iyo wixii kale oo la mid ah (Imposta fissa sulle bitazioni tradizionali) iyo Cashuurta Qiimaha Guryaha Daaraha ah (Imposta proporzionale sul valore accertato dei fabbricati);

MARKUU ARKAY Taladii uu soo jeediyay Duqa Magaalada Xamar ee uu ogaaday in ay tahay lagamamaarmaan in awood loo siiyo D. H. ee Xamar in ay ka qaadi karto tilaabooyinka Sharcigaan uu u ogolaanayo qofkii bixin cashuurta kor ku qoran.

WUXUU DEJINAYAA SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

*Waqtiga cashuurta lagu bixinayo*

Cashuurta qiimaha guryaha daaraha ah iyo midda guryaha carshaanta, baraakooyinka iyo wixii kale ee la mid ah, waxaa la bixinayaa sannad kastaba 31ka jannaayo ilaa 31ka Maayo.

Qodobka 2aad

*Xixin qayb-qayb ah (pagamento a rate)*

Qofkii lagu leeyahay cashuur ka badan hal sano ee aan awoodi karin in uu mar qar ah bixiyo, waxaa u bannaan in uu saddex qaybood (a rate) u bixiyo cashuurta lagu leeyahay ilaa muddo 6 bilood ah.

Qodobka 3aad

*Ganaax muddo daah ah (diritto di mora)*

Haddii cashuurta ku qoran qodobka 1aad lagu bixinwaayo ilaa 31 ka Maayo, ganaax muddo daah ah (diritto di mora) oo ah 5% ayaa qofkaas la saari doonaa ka billaabato 1da Juunyo ilaa 30ka Juunyo cashuurta lagu leeyahay.

Qodobka 4aad

*Xaraash (Pignoramento)*

1. Qofkii ku bixinwaaya cashuurta ku qoran qodobka 1, ilaa 30ka Juunyo, Dawladda Hoose ee Xamar waxay awood u leedahay haddii guriga cashuurta lagu leeyahay ijaar loogu jiro inay ka qaadato ijaarka dadka ku jira ilaa cashuurta lagu leeyahay ay ka dhammato, ayadoo qofka guriga leh la siindoono warqad marqaati fur ah.

2. Haddii guriga cashuurta lagu leeyahay ijaar aanan loogu jirin, cashuurtana lagu bixinwaayo ilaa 30ka Juunyo, Dawladda Hoose waxay awood u leedahay in ay xaraashto gurigaas, kaddibna ay gaddo ayadoo ka goosandoonta lacagtii gurigaas lagu lahaa.

### Qodobka 5aad

*Ciqaab xarig ah*

Qofkii u hoggansamiwaaya qodobbada 1, 2, 3, 4, wuxuu muteysanayaa xarig u dhexeya 3 bilood ilaa 6 bilood, isla markaasna lacagta lagu leeyahay waa laga qaadi doonaa.

### Qodobka 6aad

*Ka dhaafid (esenzione)*

1. Cashuurta waxaa laga dhaafikaraa qofkii gurigiisa ku jira ee la ogaado in uusan shaqaysan karin, ayadoo ay ugu wavantahay waayeelnimo ama jirro (per vecchiaia o per malattia).
2. Waxaa kale oo laga dhaafikaraa cashuurta qofkii gurigiisa ku jira oo ay caddaato in uusan waxba haysanin (nullatenente).

### Qodobka 7aad

*Baabi'in (abrogazione)*

Sharci kasta ee ka soo hor jeeda sharcigaan waa la baabi'iyay.

### Qodobka 8aad

*Dhaqangalid*

Sharcigaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu soo saaro warqadda Rasmiga ah ee Dawladda (Bollettino Ufficiale).

Wuxuuna ka mid noqon doonaa SrahSharciyada u degsan Jamhuuriyadda Dimuqradiga ee Soomaalida kuna saabsan Magaalada Xamar.

Muqdisho, 20 Dishembre 1973.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle Gaashaanle Xasan Abshir Faarax*
Duqa Magaalada Muqdisho ee Ku Meel Gaarka ah